# Dhallaanka Cusub
# XAASHIDA XAQIIQADA

Newborn Screening Fact Sheet
SOMALI

## Waa maxay baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka dhallaanka cusub ayaa lagu aqoonsadaa dhallaanka halista ugu jira xaaladaha muddo-dheer saameyn kara caafimaadkooda ama badqabkooda. Inta badan xaaladahaan lama arki karo xilliga dhalashada balse waa la daaweyn karaa ama gacan ayaa laga geysan karaa haddii mar hore la ogaado. Baaritaanka dhallaanka waxaa ka mid ah baaritaanka muunadda dhiigga, maqalka, iyo garaaca wadnaha.

**Baaritaanka muunadda dhiigga** waxaa lagu hubiyaa in ka badan 60 xaaladood, liiskooda ayaa laga heli karo sanduuqa xiga dhanka midig. Ogaanshaha hore ayaa gacan ka geysan kara kahortagga dhibaatooyinka caafimaad ee halista ah, naafonimada, iyo xitaa dhimashada.

**Baaritaanka maqalka** waxaa lagu hubiyaa wax maqal la'aanta ee baaxadiisu tahay xad laga maqli karo hadalka. Aqoonsashada maqal la'aanta goor hore ayaa gacan ka geysan karta in lala socdo hadalka, luqadda, iyo xirfadaha wada xiriirka ee dhallaanka.

**Baaritaanka garaaca wadnaha** waxaa lagu hubiyaa kooxo cilladaha wadnaha ah, oo nafta halis gelin kara oo loo yaqaano cudurada lagu dhasho ee wadnaha ee halista ah (CCHD). Haddii goor hore la sii ogaado, dhallaanka qaba CCHD ayaa inta badan lagu daaweyn karaa qalliin ama faragalino kale oo caafimaad.



### Baaritaanka muunadda dhiigga ayaa ilmaha ka hubisa:

Cillada soo saarista kaadida ee beerka
Cillada ammooniyaha ku bata dhiigga
Xaaladda yaraanta amino aasiidhka dhisa borotiinka
Cilladaha ku badashada jirka amino aasidhka finayl alanayn (2-da nooc)
Xaaladda soo saaris la'aanta jirka fiitamiinka baayotiin
Xaaladda isticmaal la'aanta jirka qaybo ka mid ah dufanka xilliyada cunto la'aanta
Xaaladda falgal-dedejiyeyaasha ee daciifka ka dhigta murqaha (2-da nooc)
Cillada qaadashada karnitiinka
Cillada ku badashada jirka ammooniya iyo walxaha sunta ah (2-da nooc)
Cilladaha la kala dhaxlo ee ku dhaca qanjirada kelyaha
Cillada fayraska la kala dhaxlo ee waxyeellada lahayn (cCMV)
Cillada la kala dhaxlo ee qanjirada tayroodhka aan firfircoonayn
Cudurka la kala dhaxlo ee qanjirada dheecaanada iyo dhididka
Xaaladda buruburin la'aanta jirka dufanka qaarkiis
Xaaladda soo saaris la'aanta tamarta jirka
Xaaladda yarida falgal-dedejiyaha galatose ebimerays
Awood la'aanta beerka ee burburinta sonkorta caanaha
Cillada la kala dhaxlo ee burburin la'aanta jirka borotiinada qaarkood (2-da nooc)
Cudurrada la kala qaado ee borotiinka cas ee dhiigga
Cillada uusan jirka soo saari karin amino aasiidhka qaarkiis
Cillada amino aasiidhka xadh-dhaafka ah ee jirka
Jirrada la kala dhaxlo ee uusan jirku finayl alalinayn u beddeli karin tayrosiin
Cillada dheefshiidka amino aasiidhka faalayn
Cillada isku dhisanka aashitada
Xaaladda u beddelid la'aanta dufanka tamar xilliyada cunto la'aanta
Xaaladda burburin la'aanta borotiinka ee jirka
Cudurka burburin la'aanta miida malabka
Xaaladda u beddelid la'aanta dufanka tamar xilliyada cunto la'aanta ee leh silsiladda dhexe/gaaban
Xaaladda u beddelid la'aanta dufanka tamar xilliyada cunto ka soomida ee leh sisiladda dhexe/gaaban
Xaaladda burburin la'aanta dufanka qaarkiis ee jirka ee leh sisiladda dhexe
Cillada la kala dhaxlo ee burburin la'aanta borotiinada iyo dufanka qaarkood (3-da nooc)
Nooca I ee falgal-dedejiye la'aanta ama yarida jirka
Cillada isticmaal la'aanta jirka fiitamiinka baayotiin
Ku badashada jirka amino aasidhka finayl alanayn
Cudurka hawlgabka ka dhiga murqaha wadnaha iyo lafaha
Xaaladda aasaasiga ah ee difaac yarida jirka
Cillada burburin la'aanta borotiinada iyo dufanka qaarkood
Habdhiska difaaca jirka ee aadka u liita
Xaaladda u beddelid la'aanta dufanka tamar xilliyada cunto ka soomida ee leh sisiladda gaaban
Cudurka nidaam-darrada isir-dhiigeedka
Cudurka nidaam darro isir-dhiigeed ee borotiinka cas
Daciifida iyo yarida murqaha laf-dhabarta (SMA)
Nidaam-darrada isir-dhiigeedka ee dhiigga cas
Xaaladda hawaysiga dufanka
Cillada amino aasiidhka tayrasayn (3-da nooc)
Xaaladda u beddelid la'aanta dufanka tamar xilliyada cunto ka soomida ee leh sisiladda aadka u dheer
cillada saameysa nidaamka neerfaha iyo qanjirada hormoonada ee ku yaala qaybta sare kelyaha
Cillada buruburin la'aanta borotiinka ee jirka ee 2-da-Metayl-iyo-3haydhroksibutayrik ka kooban
Cillada dheefshiidka amino aasiidhka faalayn ee jirka leh 2-metaylbutayrayl-COA
Cillada burburin la'aanta aamino aasidhka lusayn ee jirka ee leh 3-Haydharoksaydh-3-metaylgulutarayl-CoA
Cillada burburin la'aanta aamino aasidhka lusayn ee jirka ee leh 3-Haydharoksaydh-3-metaylgulutarayl-CoA
Cillada burburin la'aanta borotiinada qaarkood ee jirka ee leh 3-Metaylgulutakonayl-CoA

## Maxaa ku dhacaya muunadaha dhiigga ee haray iyo natiijooyinka?

Kadib baaritaanka dhallaanka, natiijooyinka baaritaanka iyo muunadaha dhiigga ee soo hara waa la keydiyaa si loogu sameeyo baaritaan dabagal ah, haddii loo baahdo. Muunadaha dhiigga ee la keydiyay iyo natiijooyinka baaritaanka ayaa sidoo kale loo adeegsadaa in lagu hubiyo in baaritaanku sax yahay, wanaajinta baaritaannada, iyo ku samaynta baaritaannada cusub ee dhallaanka dhashay. Looma isticmaalo cilmi-baaris iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan waalidka.

Waalidiintu waxay haystaan ikhtiyaar ay ku keydsadaan muunadaha dhiigga iyo natiijooyinka baaritaanka ee ilmahooda. Waxaad codsan kartaa in muunadaha dhiigga ee ilmahaaga la burburiyo, ama waxaad codsan kartaa inaad hesho muunadaha dhiigga adoo u marayo daryeel bixiyaha aasaasiga ah ee ilmahaaga waqti kasta. Waxaad sidoo kale dooran kartaa inaad oggolaato in muunadaha dhiigga ee ilmahaaga iyo natiijooyinka loo isticmaalo cilmi-baaris. Ka codso bixiyaha daryeelkaaga ama booqo mareegta Barnaamijka Baaritaanka Dhallaanka si aad u hesho foomamka iyo tilmaamaha ku saabsan sida loo codsado xulashooyinkan.

## Goorma ayaan helayaa natiijada dhallaankayga?

Natiijooyinka maqalka iyo garaaca wadnaha ee dhallaankaaga ayaa la heli doonaa isla maalinta la sameeyo baaritaanka. Kala hadal natiijooyinka daryeel bixiyahaaga.

Baarista muunadda dhiigga ayaa qaadata dhowr maalmood, balse bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee dhallaankaaga ayaa kuula soo xiriiri doona sida ugu dhakhsaha badan haddii natiijadu ay sheegto dhibaato. Booqashada fayo-qabka ilmaha ee ugu horreysa sidoo kale waa waqti ku haboon inaad kala hadasho bixiyaha daryeelka aasaasiga ee dhallaankaaga wixii ku saabsan natiijooyinka, maadaama natiijooyinka sida caadiga ah la heli karo marka dhallaankaagu jiro ku dhowaad hal toddobaad.

## Waa maxay macluumaadka gaarka ah ee la siiyo Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH)?

Kaarka baaritaanka ee dhallaanka cusub ee loo diro MDH si loo baaro wuxuu keliya ka kooban yahay macluumaad ku saabsan waalidka dhalay ilmaha iyo dhallaanka kaasoo ka caawin doona shaqaalaha inay turjumaan natiijada imtixaanka lana xiriiraan bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ee dhallaankaaga haddii loo baahdo baaritaan ama dabagal dheeraad ah. Tani waxaa ku jira, balse kuma xaddidna, magaca ilmaha, taariikhda dhalashada, waqtiga dhalashada, magaca waalidka ilmaha, iyo magaca bixiyaha daryeelka aasaasiga ah ama rugta caafimaadka dhallaanka.

## Ma diidi karaa in ilmahayga la baaro?

Haa. Haddii aadan rabin in ilmahaaga la baaro, waa inaad buuxisaa foomka *Diidmada Baaritaanka Dhallaanka Cusub ee Waalidka.* Waxaad ka codsan kartaa bixiyahaaga dhalashada nuqulka foomka ama waxaad ka soo dejisan kartaa mareegta Barnaamijka Baaritaanka Dhallaanka Cusub.

## Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaanka dhallaanka cusub:

**Baaritaanka Dhallaanka Cusub ee Minnesota (Minnesota Newborn Screening)**
www.health.state.mn.us/newbornscreening
**Barnaamijka Ogaanshaha Maqalka ee Hore ee Minnesota (MN Early Hearing Detection & Intervention Program)**
www.improveehdi.org/mn
**Maamulka Adeegyada & Dhigaalada Caafimaadka ee Mareykanka (U.S. Health Resources & Services Administration)**
https://newbornscreening.hrsa.gov
**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka (Baby's First Test)**
www.babysfirsttest.org

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaaqaab kale, wac (800) 664-7772*

PRINTED ON RECYCLED PAPER

Waxaa lagu daabacay warqad dib loo warshadeeyay


DEPARTMENT OF HEALTH

**Public Health Laboratory, Newborn Screening (Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha, Baaritaanka Dhallaanka)**
**P.O. Box 64899, St. Paul, MN 55164**
**Telefoonka (800) 664-7772 • Fakiska (651) 215-6285**
**www.health.state.mn.us/newbornscreening • health.newbornscreening@state.mn.us**



Rev.: 10/2022